WAXAA WAAJIB AH IN WARQADDAN LAGU QORO LUUQADDADA

FOOMKA GAABAN EE OGGOLAANSHAHA

Oggolaanshaha Ka-qaybqaadashada Cilmi-Baadhista – Foomka Gaaban

Hordhac

Waxaa Cusbitaalka Carruuta ee Seatlle ka-socda cilmibaadhisyo badan. Guud ahaan, yoolka cilmibaadhista loo-fuliyo waa si loo helo cilmi cusub. Cusbitaalka Children's wuxuu hawlaha cilmibaadhista u fuliyaa si uu cilmiga cusub ugu kobciyo iyo si uu u wanaajiyo daryeelka caafimaadka ee uu carruurta u fidiyo.

Waxaa lagaa codsanayaa in aad adigu ka-qaybqaadatid ama aad u oggolaatid in uu ilmahaagu daraasad cilmibaadhis ah ka-qaybqaato. Ka-qaybqaadashada cilmibaadhistu waa mid **oggolaanshahaaga** lagaga qayb-qaato. Waxaanu kugu dhiiri gelinaynaa in aad wakhti kugu filan qaadatid oo aad xubnaha qoyskaaga iyo saaxiibadaada ka-wadahadashaan arrimaha ku-saabsan daraasaddan cilmibaadhista.

Haddii aad adiga ama ilmahaagu aad daraasaddan cilmibaadhista ka-qaybqaadataan iyo haddii kaleba waxaa marwelba idiin soconaya adeegga ugu fiican ee aad ka-heshaan Cusbitaalka Children's. Go'aanka aad arrintan ka-gaadhaysid wax saamayn ah kuma yeelan doono daryeelka aad adiga ama ilmahaagu helo.

Ka-hor intaanad go'aan ka-gaadhin in aad daraasaddan cilmibaadhista ka-qaybqaadatid ama in kale, cilmibaadhayaasha ayaa ku siin doona warbixin cilmibaadhista ku-saabsan. Xogtaasi waxay noqon doontaa mid kaa caawisaa in aad go'aan ka-gaadhid in adigu cilmibaadhista ka-qaybqaadan doontid ama in aad ilmahaaga u oggolaan doontid in uu ka-qaybqaato iyo in kale.

Ka-hor intaanad ka-go'aan gaadhin in aad cilmibaadhista ka-qaybqaadan doontid iyo in kale, maxaad u baahantahay in aad ogaatid?

- **Maxay tahay sababta loo-fulinayo daraasaddan cilmibaadhista?**

  Ka hor intaanad go'aan gaadhin, dadka cilmi-baadhista fulinaya ayaa kuu sheegi doona ujeeddada daraasaddan cilmibaadhista loo-fulinayo. Waxay kuu macnayn doonaan waxay cilmi-baadhayaashu rajaynayaan inay daraasaddan cilmibaadhista ka baran doonaan.

- **Maxaa cilmibaadhistan ka-dhex dhici doona?**

  Cilmibaadhayaashu waxay kuu sheegi doonaan:
  - Muddo intee dhan ayaad adiga ama ilmahaagu aad daraasadda ku sii jiri doontaan.
  - Waxaa dhacaya haddii adiga ama uu ilmahaagu cilmi-baadhistan ka qayb galo.
  - In ay hannanada ama dawooyinka la-bixinayo ama baadhitaanada la-samaynayo ay tijaabo yihiin iyo in kale

- Daraasaddan cilmibaadhistu waxay kaga-duwantahay daryeelka caadiga ah ee aad adiga ama ilmahaagu helo

- **Maxay yihiin FURSADAHA jira.**

  Qaar ka mid ah daraasadaha cilmibaadhistu, laakiin aan dhammaatood ahayn, waxay bixiyaan xannaano iyo daweyn. Dadka wax baadhaaya waxaa khasab ku ah inay kuu sheegaan dhammaan waxa fursadaha (options) ah ee ku saabsan adiga ama ilmahaaga xanaanayntiina iyo daweyntiina. Ka hor intaanad ogolaanin ka qayb gelida daraasaddan cilmibaadhista, waa inaad ogaataa xannaanada adiga ama uu ilmahaaga dooranyo,

  Maxay yihiin HALISAHA daraasaddan cilmibaadhista lagala kulmi karo.

  Cilmibaadhayaashu waxay kuu sheegi doonaan:
  - Halisaha adiga ama ilmahaaga idinka soo gaadhi kara ka-qayb-qaadashada daraasaddan cilmi-baadhista.
  - Heerka ay halista cilmibaadhistan ka iman karta ay gaadhsiisnaan karto marka la-barbardhigo halista ka timaadda xannaanada caadiga ah.
  - Haddii ay jiraan wax halis ah oo aan hadda la' ogayn.
  - Maxaa dhacaya haddii dhaawac ka soo-gaadho cilmibaadhistanbaadhidan, yaana bixinaaya lacagta lagu daweynaayo dhaawaca ka iman kara baadhida.

- **Maxay yihiin FAA'IIDOOYINKA daraasaddan cilmibaadhista laga helayo.**
  Dadka wax baadhayaa waxay kuu macnayn doonaan in ay cilmibaadhistu adiga ama ilmahaaga ay faa'iidoo idiin leedahay. Waxay kuu sheegi doonaan in ay cilmibaadhistu ay bukaanada iyo bulshada mustaqbalka ay faa'iido u yeelan doonto iyo in kale.

- **Waxaad u baahantahay in aad wax ka-ogaatid heerka QARSOODINIMADA macluumadka la-qaadayo**
  Xogta adiga ama ilmahaaga ku-saabsan ee ay cilmibaadhayaashu idinka helayaan waxaa loo-xafidayaa si qarsoodi ah. Xogtan waxaa la yidhaahdaa xogta cilmibaadhista.

  Marka ay daraasaddan cilmibaadhistu tahay mid ku-saabsan dawooyin ama qalab caafimaad oo la-tijaabinayo, waxaa xogta ama macluumaadka cilmibaadhista heli doona laba kooxood. Kooxda koowaad waa Maamulka Cuntada iyo Dawooyinka ee Dawladda Maraykanka /U.S. Food and Drug Administration (FDA). FDA waxay masuul ka tahay Maraykanka ammaanka dawooyinka iyo adeegyada caafimaadka ee laga isticmaalo gudaha Maraykanka . Kooxda labaad waa shiriikada soo-saartay dawooyinka ama qalabka caafimaad ee tijaabada lagu samaynayo. FDA iyo shiriikaddu si ay u hubiyaan macluumaadka cilmibaadhista, waxay eegi karaan diiwaanadaada caafimaadka ama kuwa ilmahaaga. Dhammaan xogta adiga ama ilmahaaga ku-saabsan ee loo-dirayo shirkadda ama FDA waxaa loo-xafidayaa si qarsoodi ah.

- **Waxaad u baahantahay in aad wax ka-ogaatid arrimaha KHARASHKA ku-saabsan**

  Waa laguu sheegi doonaa haddii uu jiro wax qarash dheeraad ah oo kaa soo gaadhaya ka qayb gelidda cilmibaadhista.

Waxaa foomkan oggolaanshaha laga dhigi karaa ha lama in ka-badan oo barbarayaal, oo midweliba ka-kooban yahay foomka oggolaanshaha ee asalka ah, laakiin waa in ay dhammaantood noqdaan hal foom oo isku mid ah oo oggolaansho.

.

Maxaa dhacaya haddii aanad doonayn in aad daraasadda ka-qaybqaadatid? Haddii aad damacdid in aad daraasadda ka-baxdidse?

Ka qayb geliddu waa mid ikhtiyaarkaaga ku-xidhan. Haddii aad MAYA dhahdidna wax-dhibaato ah MA LAHA. Haddii aad bilowdid, adiga ama ilmahaagu mar-kasta ayaad iskaga bixi kartaan. Majirayo wax ganaax ah ama waayitaan faa'iidooyin oo kaa soo gaadhaya Diidmadaada hore ama ka-bixitaanka cilmibaadhista marka aad bilowdid kaddib, labadaba xorbaad u tahay.

Waxaa kale dhici karta ay cilmibaadhayaashu ay adiga ama ilmahaaga daraasadda idinka saaraan. Waxaa sidaas samayn doonaan haddii ay tallaabadaasi tahay midda adiga ama ilmahaaga ugu-fiican (ee ay dantu idiinku jirto). Haddii ay daraasadda joojiyaan, waxay kuu sheegi doonaan sababta joojinta keentay.

Maxaa lagaaga baahanyahay haddii aad doonaysid in aad cilmibaadhista ka-qaybqaadatid?

Haddii aad doonaysid inaad aqoon dheeraad ah u yeelatid arrimaha cilmibaadhista ku-saabsan, waxaad la-kulmi doontaa cilmibaadhe arrintaas kaa caawin doona. Cilmibaadhaha oo kaashanaya tarjumaan sharciyaysan, ayaa faahfaahin kaa siin doonaa daraasadda cilmibaadhista. Waxaa lagugu dhiiri-gelinayaa in aad su'aalo soo-jeedisid! Haddii aad doonaysid in aad daraasadda cilmi-baadhista ka-qaybqaadatid, waxaa lagaa codsan doonaa in aad foomkan saxeexdid. Waxaa lagu siin doonaa nuqulka saxeexan ee foomkan si aad u dhigatid. Waxaa kale oo lagu siin doonaa foomka oggolaanshaha ee Af-ingiriisiga ku-qoran ee sharraxaadda ka bixinaya daraasaddan. Cilmi-baadhuhu wuxuu ku-saxeexi doonaa foomka luuqadda Ingiriisiga ku-qoran.

Lamabarada Taleefoonka ee Muhiimka ah:

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah ku-saabsan daraasaddan cilmibaadhista, waxaad wacdaa cilmibaadhayaasha bogga ugu horeeya ee foomkan. Si ay cilmibaadhayshu ay kuu soo-wacaan oo ay jawaabo iyo faahfaahin kaaga siiyaan su'aalaha aad qabtid u sheeg magacaaga iyo lambarka taleefoonkaaga, kaddibna iyaga oo tarumaan kaashanaya ayaa ku soo wici doonaa.

Haddii adiga ama ilmahaagu aad la kulantaan arrin kedis ah oo la-xidhiidha ka-qaybqaadashada cilmibaadhistan, waxaad wacdaan 911.

Dadka ka qayb gelaya cilmibaadhistan waxay leeyihiin xuquuq. (Bogga ugu dambeeya ee foomkan wuxuu kuu sheegayaa xuquuqda ay leeyihiin dadka ka qayb gelaya cilmibaadhistan). Haddii aad wax su'aal ah ka qabtid xuquuqahan, waxaad wici kartaa guddiga IRB, taleefoonka (206) 987-7804. IRB waa guddi uu xil ka-saaranyahay ilaalinta xuquuqaha carruurta iyo qoysaska cilmibaadhistan ka-qayb-qaadanaya. Gudiga IRB waxay ka masuul tahay ilaalinta/dhowrida xaquuqda carruurta iyo faamliga ka qayb gelaya baadhida. Guddiga IRB waxaad siisaa magacaaga iyo lambarka taleefoonkaaga,Ka tag magacaaga, kaddibna xubin ka-tirsan guddigaas oo kaashanaya qof tarjumaan ah ayaa codsigaaga kaga jaawibi doona.

FADLAN OGOW: Haddii aad go'aansatid in aad daraasadda cilmibaadhista ka-qaybqaadatid wuxuu cilmibaadhuhu foomka oggolaanshaha kugu turjumi doonaa luuqaddaada. Foomka oggolaanshaha ee la turjumay waxaa ku jiri doona dhammaan faah-faahinta ku-saabsan daraasadda cilmi-baadhista. Foomka waxaa lagu siin doonaa isla-markay turjumaaddu dhammaato. Sida qaalibka ah waxay hawsha turjumaaddu qaadataa 1-2 toddobaad.

Waxaa foomkan oggolaanshaha laga dhigi karaa ha lama in ka-badan oo barbarayaal, oo midweliba ka-kooban yahay foomka oggolaanshaha ee asalka ah, laakiin waa in ay dhammaantood noqdaan hal foom oo isku mid ah oo oggolaansho.

.

Caddaynta Ka-qaybgalaha/Waalidka/Koriyaha Sharciyaysan

Waxaa afka la isiiyey sharraxaad afka ah oo ku-saabsan daraasadda cilmibaadhista. Marka sharraxaadda la isiinayey waxaa joogay qof turjumaan ah oo luuqaddayda si wanaagsan ugu hadlaya. Waxaan haystay fursad aan su'aalo ku soo jeediyo. Waxaan fahansanahay in dadka ay magacyadoodu ku qoranyihiin bogga kowaad ee foomkan ay jawaabo iga siin doonaan ka jawaabi doonaan su'aalo kasta oo mustaqbalka igu soo dhaca oo ku-saabsan daraasadda ama xuquuqaha ka-qaybgalayaasha. Waxaa garanayaa lambarada taleefoonka ee aan wici doono haddii ay dhacaado xaalad kadis ah. Waxaan ikhtiyaarkayga ku oggolaaday in aan daraasaddan cilmibaadhista ka-qaybgalo ama uu ilmahaygu ka-qaybgelo.

FADLAN OGOW: Haddii uu ka-qaybgalaha daraasaddan cilmibaadhista ku soo biiraya uu yahay in la korsanayo ama ilmo gobolka ka-socda, fadlan waxaad cilmibaadhaha ama shaqaalahooda aad u sheegtaa qof oggolaanshahaaga helaya.

_____

Magaca Ka-qaybqaataha Cilmibaadhista
Name of Research Participant

_____

Magaca Ka-qaybqaataha Cilmibaadhista ***(waxaa loo-baahanayaa haddii ay da'diisu ≥ 14 sano)***
Signature of Research Participant ***(required if ≥ 14 yrs. of age)***

_____ _____

Taariikhda **Wakhtiga**
Date **Time**

_____

Saxeexa Waalidka ama Koriyaha Sharciyaysan
Signature of Parent or Legal Guardian

_____ _____

Taariikhda **Wakhtiga**
Date **Time**

_____

Magaca Waalidka ama Koriyaha Sharciyaysan
Printed Name of Parent or Legal Guardian

_____ _____

Taariikhda **Wakhtiga**
Date **Time**

Waxaa foomkan oggolaanshaha laga dhigi karaa ha lama in ka-badan oo barbarayaal, oo midweliba ka-kooban yahay foomka oggolaanshaha ee asalka ah, laakiin waa in ay dhammaantood noqdaan hal foom oo isku mid ah oo oggolaansho.

.

Xogta Tarjumaanka
Interpreter Information

FADLAN WAXAAD OGAATAA: Waxaa magaca turjumaanka la diiwaan-gelinayaa keliya haddii oggolaanshaha lagu diiwaan-geliyey Foomka Gaaban ee Oggolaanshaha iyo/ama foomka oggolaanshaha ee turjuman ee waafaqsan.
PLEASE NOTE: Interpreter name is only recorded if consent is documented via a corresponding translated Short Form Consent and/or translated consent form.

_____

Magaca Turjumaanka **Taariikhda**
(Haddii xilligi soo-bandhigidda hore ee daraasadda turjumaan la-isticmaalay)
Name of Interpreter **Date**
(If interpreter is used during initial presentation of the study)

Xogta Markhaatiga

Witness Information
FADLAN WAXAAD OGAATAA: Marka soo-bandhigidda hore ee daraasadda la soo-bandhigo kaddib, marka la isticmaalayo Foomka Gaaban ee Oggolaanshaha si loo-diiwaangeliyo oggolaanshaha/fasaxa waalidka laga helayo ama shuruudaha kale ee u yaalla IRB waxaa loo-baahanyahay magaca iyo saxeexa markhaatiga.

PLEASE NOTE: A witness name and signature is required when using the Short Form Consent to document consent/parental permission after the initial presentation of the study or as otherwise required by the IRB.

Caddaynta Markhaatiga

Witness Statement
Markii daraasaddan afka laga sheegay waan joogay.
I have been present during the oral presentation of this research study.

_____

Magaca iyo Saxeexa Markhaatiga **Taariikhda**
Name and Signature of Witness **Date**

Og: Ka-qaybqaataha Cilmibaadhista ama Waalidka (waalidiinta)/Koriyaha Sharciyaysan Diiwaanada Caafimaadka **(*haddii ay sidaasi habboontahay*)**
Copies to: Research Participant or Parent(s)/Legal Guardian
Medical Records **(*if appropriate*)**

Waxaa foomkan oggolaanshaha laga dhigi karaa ha lama in ka-badan oo barbarayaal, oo midweliba ka-kooban yahay foomka oggolaanshaha ee asalka ah, laakiin waa in ay dhammaantood noqdaan hal foom oo isku mid ah oo oggolaansho.

.

Xuquuqaha Ka-qaybqaataha Cilmibaadhista *

Qof-kasta oo laga codsado in uu daraasad cilmibaadhis ah ka-qaybqaato wusuu leeyahay xuquuqo. Maadaama aad tahay ka-qaybqaate cilmibaadhis, adiga ama ilmahaagu wuxuu yeelanayaa xuquuqaha hoos lagu qoray:

1. In laguu sheegayo waxa la isku-dayayo in daraasaddan lagu ogaanayo,

2. In adiga ama ilmahaaga loo-sheego waxa soo-gaadhi kara muddada uu daraasadda ku-jiro. In lagu sheego in mid kasta oo hannaanada la-isticmaalayo, dawooyinka ama qalabyada la adeegsanayo uu ka-duwanyahay kuwa sida caadiga loo isticmaalo,

3. In laguu sheego halisaha ugu muhiimsan ee ugu badan, waxyeelooyinka ama raaxa-la'aanta adiga ama ilmahaaga ka-soo-gaadhaysa muddada uu daraasadda cilmibaadhista ku-jiro,

4. In laguu sheego bal in ay jiraan wax faa'iido ah oo adiga ama ilmahaagu uu ka-qaybqaadashada daraasaddan ka heli karo, haddii ay jiraana in la idiin sheego waxa ay noqon karaan,

5. In laguu sheego fursadaha kale ee aad adiga ama ilmahaagu haysto ee ka-fiicaan ama ka xun ka-qaybqaadashada daraasaddan cilmibaadhista,

6. In laguu oggolaado in aad soo-jeedisid wixii su'aalo ah ee daraasaddan ku saabsan ka-hor intaanad ka-qaybqaadashada oggolaan iyo kaddib marka aad oggolaatid iyo inta ay daraasaddu socotaba,

7. In laguu sheego adeegga dawaynta ee aad heli karaysid, haddii ay dhibaatooyin kaa soo-gaadhaan,

8. In aad gabi ahaanba diidid ka-qaybqaadashadaada ama tan ilmahaaga ama in aad adiga ama ilmahaagu xor u tihiin in aad iskaga baxdaan marka aad ka-qaybqaadashada bilowdaan kaddib. Go'aankani ma noqon doono mid saamayn doona xuquuqda aad ama ilmahaagu u leeyahay in uu helo daryeelka, haddii aad adigu ama ilmahaagu diiddu in uu ka-qaybqaato daraasadda,

9. In aad heshid nuqulka foomka oggolaanshaha ee aad saxeexday oo taariikhdana lagu muujiyay,

Waxaa foomkan oggolaanshaha laga dhigi karaa ha lama in ka-badan oo barbarayaal, oo midweliba ka-kooban yahay foomka oggolaanshaha ee asalka ah, laakiin waa in ay dhammaantood noqdaan hal foom oo isku mid ah oo oggolaansho.

.

10. In aan wax cadaadis ah lagu saarin oo aad u xor u noqotid marka aad ka fiirsanaysid go'aanka aad ka-gaadhaysid in adiga ama ilmahaagu uu daraasadda cilmibaadhista ka-qaybqaadanayo iyo in kale.

*Waxaa qormadan laga soo qaatay Dukumeentiga Xuquuqaha Tijaabooyinka ee Gobolka Kaalifoorniya (California)

Waxaa foomkan oggolaanshaha laga dhigi karaa ha lama in ka-badan oo barbarayaal, oo midweliba ka-kooban yahay foomka oggolaanshaha ee asalka ah, laakiin waa in ay dhammaantood noqdaan hal foom oo isku mid ah oo oggolaansho.

.